

# Magdhowga Shaqada Buugga-hagaha

wny cosh

Western New York Council on Occupational Safety and Health

GCIU 23

*Buuggaan hagaha waxaa loogu tallogalay ujeedooyinka warbixinta ah kaliya, oo kama koobno tallo sharci ah (ama aasaaska xiriirka qareenka-macmiilka ee WNYCOSH).*

# Waa maxay Magdhowga Shaqaalaha?

Nidaamka Magdhowga Shaqaalaha waxaa loo aaasaasay in loogu magdhabo shaqaalaha dhaawacan oo daaweynta caafimaadka, mushaarada lumay, ama dhimashada sababtay dhaawaca goobta shaqada ama cudurka shaqada. Badrooniyada waxaa looga baahanyahay inay u iibiyaan caymiska magdhowga shaqaalahooda. Caymiska magdhowga waxaa loo heli karaa iyada oo aan laga eegin "qaladka" shaqaalaha ama badrooniga.

***Magdhowga Shaqaalaha wuxuu daboolaa dhaawacyada iyo jirooyinka ee la xiriirto shaqada oo dhammaan shaqaalaha ah—oo ay ku jiraan shaqaalaha aan buugga ku jirin, ku meelgaarka ah, iyo sharci la'aanta ah.***

## Magdhowga Shaqaalaha *ma* daboolo:

- Qandaraaslayaasha madaxabanaan. Waxaa tahay qandaraasle madaxbanaan haddii aad jaheysid shaqadaada gaarka ah, aad xor u tahay inaad siisid adeegyo la mid ah macmiilada, oo aad ka shaqeysid shaqada ama aasaaska ku meelgaarka ah, ayaa masuul ka ah shaqooyinka ganacsiga madaxabanaan sida bixinta qarashaadkaaga ganacsiga, iwm.
    - Haddii badroonigaaga kuu sheego goorta, goobta, iyo sida loo sameeyo waajibaadyadaada waxaad tahay shaqaale, xittaa haddii aad heshid 1099 oo badroonigaaga dhaho inaad tahay qandaraasle madaxbanaan.
    - Haddii aad u maleysay in si qalad ah loo cadeeyay, ka soo wac WNYCOSH wixii caawin ah, (716) 833-5416.
- Dhaawacyada halka shaqaalaha dhaawacmay ugu tallogalay inay waxyeelaan nafsadooda ama shaqaale kale.
- Dhaawacyada sababay kaliya sarqaansanaanta shaqaalaha dhaawacmay.



# Waxa La Sameeyo Haddii Aad ku Dhaawacantay Shaqada

**Waxaa jiro sadex tallaabo ee ku jiro Sheegashooyinka Magdhowga Shaqaalaha:**

1. **Ku soo wargeli dhaawacaaga Badroonigaaga**
2. **Hel Daryeelka Caafimaad**
3. **Xarey Sheegashada Magdhowga Shaqaalaha**

## Tallaabada 1: Ugu soo wargeli dhaawacaaga qoraal ahaan badroonigaaga 30 maalmood gudahood ee shilka

- Haddii ay suurtogaltahay, waa inaad ogeysiisaa badroonigaaga ka hor inta aadan shaqada ka tagin maalinta dhacdada.
- Buuxi wargelinta dhacdada ama u qor warqad badrooniga NAFSADAADA haddii ay suurtogaltahay. Ha u ogolaan in badroonigaaga buuxiyo inaad adiga saxiixdid.
- Waxaad heysataa 30 maalmood si loo soo ogeysiiyo badroonigaaga si markaas loogu qalmo Magdhowga Shaqaalaha.

## Tallaabada 2: Hel daryeelka caafimaad

*Waa inaad dhaqtar aragtaa sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogalka ah dhaawacaaga kadib. Waxaad xaq u leedahay inaad dooratid dhaqtarkaaga caafimaadka, haddiiba isaga ama iyada ay yihiin bixiyaha Magdhowga Shaqaalaha loo ansixiyay.*

**Si aad u heshid bixiyaha la ansixiyay:**

- Weydii dhaqtarkaaga joogtada ah haddii isaga ama iyada ay yihiin bixiye loo ansixiyay.
- Booqo Xarunta Caafimaadka Shaqada: www.health.ny.gov/environmentalworkplace/clinic.htm.
- Xarunta Caafimaadka Shaqada Western New York waxay ku taalaa ECMC, (716) 898-5858.
- Ka raadi dhaqtar Goobta xogta Magdhowga Shaqaalaha, ee www.wcb.ny.gov/health-care-provider-search/ Waxaad ka raadin kartaa luuqada, goobta, taqasuska, ka midka ah xaqiiqaha kale. Aaga raadinta waxaa kaliya oo lagu heli karaa af Ingiriis.
- Waxaad kas soo wici kartaa (877) 632-4996 wixii caawin ah ee bixiyaha la ansixiyay. Waxaad codsan kartaa turjubaan luuqad markii wakiil soo galo leenka.

## Tallaabada 3: Xarey sheegashada Magdhowga Shaqaalaha adiga oo isticmaalayo C-3

*Si aad ugu qalantid Magdhowga Shaqaalaha, Waa INAAD ku xareysaa Foomka C-3 gudaha 2 sanno ee dhaawacaaga, ama ogaanshaha jirooyinkaaga waxay la xiriirtaa shaqada.*

- Jawaabahaaga ee foomka C-3 waa aasaaska sheegashadaada, marka hubi inaad uga jawaabtid sida saxda ah ee suurtogalka ah.
- Qareen ama wakiil shatiyeysan ayaa kugu caawin karo buuxinta Foomka C-3.
- Hubi inaad qortid dhammaan shaqooyinka aad ka shaqeyneysay waqtiga aad dhaawacantay.

- Wixii caawin ah ee buuxinta Foomkaaga C-3, waxaad ka soo wici kartaa U doodaha Shaqaalaha Dhaawacmay (877) 632-4996. Waxaad codsan kartaa turjubaan markii aad wacdid).
- Waxaad ka soo wici kartaa Qadka Xarunta Shaqaalaha WNYCOSH wixii caawin ah oo buuxinta C-3. (716) 206-3550 wixii caawinta luuqada ee dhameystirka C-3.

**Ku xareey Onleenka Foomka C-3**

Waxaad ku xareyn kartaa onleenka ee www.wcb.ny.gov/onlineforms/c3/C3Form.html.

**Ku xareey warqada Foomka C-3**

Waxaad ka dajisan kartaa foomka C-3 oo aad ku buuxin kartaa. Booqo www.wcb.ny.gov/content/main/forms/c3.pdf.

**Booqo Xafiiska Walboo Magdhowga Shaqaalaha**

Si aad u heshid koobiga warqada ee Foomka C-3 xafiiska Buffalo wuxuu ku yaalaa 295 Main St. Suite 400, Buffalo, NY 14203.

## Faa'idooyinka Magdhowga Shaqaalaha

- Magdhowga Shaqaalaha waxay bixiyaan caymiska caafimaadka oo dhaawacyada ka dhacay shaqada.
- Wuxuu daboolaa lumitaanka maqalka iyo cudurada aad ka heshay sabab la xiriirto nooca shaqada aad sameysid.
- Waxay faa'idooyin siisaa qoyskaaga haddii aad dhimatid adiga oo shaqadaada sameynayo.
- Haddii ay bixiso badelka mushaarka haddii aysan kuu suurtogaleyn inaad shaqeysid, ama aad ka shaqeysid isla heerka lacag bixinta sida aad horay u sameysay.

## Lumitaanka Maqalka Shaqada

Haddii aad ka shaqeysid goob shaqo qeylo ah oo aad la dhibaatootid lumitaanka maqalka waxaad xaq u yeelan kartaa "magdhowga lumitaanka maqalka." Waxaa jiro dhoor waxyaabo oo la tixgeliyaa:

**1.** Waa inaad ka fogaataa jawiga qeylida ah oo aad leedahay lumitaanka maqalka ku filan si aad ugu qalantid. Waxaad u baahaneysaa inaad qaadatid baaritaanka maqalka oo waxaa la sameyn karaa illaa 90 maalmood ay dhaafto maadaama gaaristaada ugu dambeysay ee qeylida goobta shaqada. Baaritaankaan waa inuu muujiyaa lumitaanka maqalka ugu yar oo ay ku jiraan wargelinta ka imaaneyso dhaqtar oo dhahayo lumitaanka waxaa sababay gaarista qeylida ee goobta shaqada. Guddiga Magdhowga Shaqaalaha kama baaran dagayaan sheegashada iyada oo aan jirin waraaqo cadeynayo.

**2.** Waxaad haysataa 2 sanno iyo 3 bilood ee ka bilow markii aad ka tagtay goobtaada shaqada qeylida ugu dambeysay ee aad ku xareysid sheegashada lumitaanka maqalka adiga oo isticmaalayo foomka C-3.

## Cudurka Shaqada

Mararka qaar shaqadaada ayaa ku xanuunsiin karto. Qalabka aad la shaqeysid, ama jawiga aad ku shaqeysid waxay sababi kartaa cuduro oo ay ku jiraan cudurka sambabka ama dhibaatooyinka murqaha lafaha sida walbahaarka dhaawacyada ku celinta. Mararka qaar dhibaatooyinkaa waxay soo baxaan kaliya muddo kadib. Waxaad xaq u leedahay daaweynta caafimaad oo cudurka shaqada, sida dhaawacyada kale, oo waa inaad xareysaa sheegashada cudurka shaqada ee 2 sanno gudahood ee ogaanshaha cudurkaaga waxay ku xirantahay shaqadaada.

Isticmaalka feelka Foomka C-3 ee sheegashadaada.

## Faa'idooyinka Dhimashada

*Mararka qaar shaqaalaha waxay u dhintaan sabab la xiriirto xaaladaha shaqada oo aan badbaado aheyn.*

Faa'idooyinka dhimashada Magdhowga Shaqaalaha waxaa ku jiro:

- Qarashaadka Duugta oo illaa $10,000 oo qeyb ka mid ah New York.
- Illaa 2/3 oo mushaarkaaga isku celcelinta isbuuclaha oo xaaskaaga ama carruurtaada badbaadeyso.

Ka fiiri Hagaha Illaha Qoyska WNYCOSH oo 14 luuqadood wixii warbixin dheeraad ee wnycosh.org/family.

## Badelida Mushaarka (Mushaarka Lumay)

- Haddii ay kuu dhaafto wax ka badan 7 maalmood oo shaqo ah sabab la xiriirto dhaawacaaga, Magdhowga Shaqaalaha waxay bixin karaan qaar ka mid ah mushaaradaada lumay.
- Haddii aysan guud ahaan kuu suurtogaleyn inaad shaqeysid, waxaad heleysaa **illaa** 2/3 oo isku celceliska mushaarkaaga isbuuclaha (sida ku saleysan daqliga ka imaanayo dhammaan shaqooyinka aad ka shaqeyneysay goortii aad dhaawacneyd).
- Haddii aad qeyb ahaan curyaan tahay, ama kuu suurtogaleyso inaad ka shaqeysid badelada qaar, waxaad u baahaneysaa inaad muujisid inaad shaqeyneysid ama shaqo raadineysid. Tani waxaa loo yaqaan Lifaaqa Suuqa Shaqada.
- Dhaqtarkaaga ayaa go'aansanayo heerkaaga curyaannimada.
- Caymiyaha badrooniga wuxuu codsan karaa inaad aragtid Baaraha Caafimaadka Madaxabanaan (IME). Waa inaad ka qeybgashaa balanta IME haddii lagu weydiiyo inaad sidaas sameysid.

Badrooniyada loogama baahno inay xareeyaan sheegashada magdhowga illaa ay ku isticmaalaan ugu yaraan $1,000 ee dhaawaca ama jirada. Xittaa haddii badroonigaaga ku siiyo inuu bixiyo qarashaadkaaga caafimaadka ee ka baxsan nidaamka Magdhowga Shaqaalaha, waad ku xareyn kartaa weli sheegasho Guddiga Magdhowga Shaqaalaha adiga oo xareynayo foomka C-3, si markaas aad uga illaalisid xaalado aan la fileyn ee la xiriirto dhaawacaaga ama jirooyinka. **Haddii aadan ku xareyn sheegasho labo sanno gudahood waxaad lumineysaa kartida lagu daboolo sheegashadaada oo inta badan dacwadaha.**





## Lifaaqa Suuqa Shaqada

Lifaaqa Suuqa Shaqada waxaa laga wadaa raadinta shaqo ama si firfircoon u tababarida shaqada.

- Madaxbanaanida shaqo raadinta firfircoon
- Si firfircoon u isticmaalo illaha NYS DOL:
  - ✳ Adeegyada Dib u shaqaaleysiinta NYS DOL
  - ✳ Xarumaha Shaqada Hal Joogsi
  - ✳ Adeega Shaqada Kale
- Si firfircoon uga qeybqaato Shaqada Qofka weyn iyo Joogteynta Adeegyada Waxbarashada-Dayactirka Shaqada (ACCESS-VR)
- Si firfircoon uga qeybqaato barnaamijka tababarka shaqada
- Ka qeybgal xaalada waxbarashada la aqoonsanyahay waqti buuxo

## Hayso Diiwaanadaan:

- Hayso qoraalada wada sheekeysiga badroonigaaga, gaar ahaan haddii aad dhaawacaaga hadal ahaan usoo wargelisay
- Rasiidyada gaadiidka u socdo iyo ka imaanshaha balamaha caafimaadka
- Rasiidka lacag bixinta oo mid walba ama dhammaan shaqooyinka aad ka shaqeysay waqtiga dhaawacaaga
- Waraaqo walba ee ka imaanayo Guddiga Magdhowga Shaqada.

## Maxaa dhaco kadib markaan xareeyo sheegashadeyda?

Badroonigaaga wuxuu ogolaan karaa sheegashadaada.

Badroonigaaga wuu diidi karaa sheegashadaada.

Badroonigaaga wuxuu ku siin karaa xalinta sheegashadaada.

**Haddii badroonigaaga ogolaado sheegashaada:**

- Caymiyaha badroonigaaga wuxuu bilaabayaa bixinta qarashaadka caafimaadka iyo mushaarada lumay kadib xaqiijinta iskucelceliska mushaarkaaga isbuuclaha.

***Haddii badroonigaaga bixiyo xalinta sheegashaada (Qeybta 32 Ka dhaafayaasha):***

- Xalinta waa hal waqti, lacag bixinta yar ee diyaarsan ee faa'idooyinka caafimaadka iyo mushaarka socdo.
- Waa inaad kala hadashaa baahidaada mustaqbalka daryeelka caafimaadka dhaqtarkaaga ka hor ogolaanshaha xalinta.
- Waa inaad kala tashataa qareen ama wakiil shatiyeysan ka hor ogolaanshaha xalinta.

***Haddii badroonigaaga diido sheegashadaada:***

- Garsooraha Sharciga Magdhowga Shaqaalaha wuxuu qabanayaa dhageysi oo go'aansanayaa haddii aad u qalantid, iyo tirada magdhowgaaga, haddii aad u qalantid.
- Waa inaad ka qeybgashaa dhageysiga, oo bixi dhammaan waraaqaha la codsaday.
- Haddii sheegashadaada la diido, waxaad xaq u leedahay inaad ka racfaanka qaadatid go'aanka.
- Badroonigaaga sidoo kale wuu ka racfaan qaadan karaa go'aanka garsooraha.

Sababaha Sheegashooyinka Loo diiday:

- Badroonigaaga wuxuu dhihi karaa in dhaawacaaga ama jiradaada ay dhacday ka hor inta aadan u shaqeyn iyaga.
- Badroonigaaga wuxuu dhihi karaa inaadan aheyn shaqaale (waxay dhihi kartaa inaad tahay qandaraasle madaxbanaan).
- Badroonigaaga wuxuu dhihi karaa in dhaawaca uusan ka dhicin "xaalada shaqada." tusaale ahaan dhaawaca ama jirooyinka waxay ka dhaceen banaanka shaqada.



## Waxaad xaq u leedahay turjubaanka luuqada iyo fasiraada

- Markii aad waceysid Guddiga Magdhowga Shaqaalaha, waxaad weydiin kartaa turjubaan markii wakiil soo galo qadka.
- Markii aad raadineysid bixiyaha caafimaadka la ansixiyay, waxaad raadin kartaa dhaqaatiirt haysto turjubaano luuqadaada ee www.wcb.ny.gov/health-care-provider-search/ Bogga raadinta waxaa lagu heli karaa kaliya af Ingiriis.
- Haddii aad dareentid inaadan helin adeegyada fasiraada oo kugu fillan ama laguu diiday adeegyada, waxaad ku xareyn kartaa cabasho http://www.wcb.ny.gov/content/main/forms/lac1.pdf

## Waxaad xaq u leedahay wakiil sharci

Waxaad xaq u leedahay qareen ama wakiil sharciyeysan si uu kaaga caawiyo nidaamkaan.  Waa inaadan si toos ah lacag u siin qareen ama wakiil shatiyeysan. Haddii aad heshid qeybta Mahdgowga Shaqaalaha, qidmooyinka qareenka waxay ka soo baxeysaa magdhowgaaga.

Soo wac (800) 342-3661 ama booqo adeega gudbinta New York Bar Association, www.findalawyernys.org, si aad u heshid qareenka Magdhowga Shaqaalaha ee adiga kuu dhow.

# Badroonigaaga wuu ku ceyrin karaa ama kaa aarsan karaa ka xareynta Magdhowga Shaqaalaha.

WNYCOSH ayaa ku caawin karta haddii aad dhibaatooyin ku qabtid nidaamka Magdhowga Shaqaalaha.

**Qadka Xarunta Shaqaalaha WNYCOSH (716) 206-3550**

# WNYCOSH
## Xarunta Shaqaalaha




**Ku faano Taageerada Shaqaalaha ee La Dagaalamayo Cadaalada (Luuqada iyo Fasiraada waxaa Maalgeliyay):**

NEW YORK STATE UNION STRONG AFL-CIO

বাফেলো বাংলা
BUFFALO BANGLA NEWSPAPER

Lipsitz Green Scime Cambria LLP

LAW OFFICE OF KATHRYN M. KIRSCH
Delivering Results for Injured Workers

Waxaa hormariyay: **Genevieve Rados**

2018 WNYCOSH Frank Dolce Saaxibta U doodaha

2495 Main Street Suite 438
Buffalo, NY 14214
(716) 833-5416
Qadka Xarunta Shaqaalaha (716) 206-3550
wnycosh.org/comp